#03 | Sept 14, 2020

In The Loop

Qoraalka Codadka Qaxotiga

Qoraalka codadka qaxootiga waxaa loogu talagalay soo bandhigada dhibaatooyinka heysto bulshada Qaxootiga ah iyo waliba bulshada martida looyahay oo ku nool Dadaab iyo xaal uhelidooda. Tani waxaan kuso bandhigaayna walaca bulshada iyo su'aalo la weydiiyay hayadaha samafalka ee xeryahha qaxootiga dhaadhaab.

Dhibaatada u ku hayo Cabuuqa Covid-19 dadka naafada ah

Sual: Sidaan ognahay HI waxay mas'uul ka tahay dadka naafada ah, waagi hore waxay na siin jireen gargaar dhanka aaladaha sanadkiiba laba jeer, waxaana lagu sameyn jiray fagaaraha dadweynaha, sidoo kale waxaa jiray daaweyn, hasee ahaate, laga bilaabo 2019 ila manta wax caawinaad ah manaan helin. Dadku hadda waxey isticmaalaan aalado duugoobay, oo ka horjoogsanaya inay heelan adega daaweynta duugista. Intaas waxaa sii dheer, siduu ubilawdaay Cabuuqa Corona, adeega daaweynta duugista ayaa yaraatay. Hayaada UNCHR waxay naga taageeri jirtay iyada oo loo sii marinayo la-hawlgalayaal kale oo bixin jiray qalab iyo daaweyn. Tani hada ma helno.

Gudoomiyaha, Gudiga Naafada Xerada Dhagaxley

Jawabta Hayada HI: Waxaan soo iibsanaa qalab caawimaad sanadkiiba halmar, laakiin waxaan bixinaa laba jeer sanadkii. Qalabka caawimaadda ayaa la rabay in lasoo iibiyo Maarso, 2020, laakiin duruufaha jira awgood ee Covid-19', ma aanan awoodin. Hadda waanso iibinay oo waxay ku jiraan xafiisyadeena. Ama dhamaadka bisha Ogosto ama usbuuca koowaad ee sebtember, aaladaha waxaa loo qaadayaa Ifo iyo Dhagaxley.

Sidoo kale, waxan soo saarnaa aaladaha kaalmooyinka, waan sameynay taas, sidaa darteed, waxaan kula talinaynaa ka-faa'iideystayaasha inay yimaadaan, waan qiimeynaynaa oo waxaan siineynaa aaladaha aan kusoo sarnaay dhadaab.

Arrinta daweynta, waxaan leenahay labo xarumood midna Ifo midna Dhagaxley. Kulamada daaweynta ayaa socdaa. Waxaan leenahay socod ku tag xaafadaha shaqaalaheena wacyigalinta ee sameeya fadhiyada daaweynta.

Naqshadeyntena mashruuca waa dhaqancelin iyo helitaanka adeegyo, ma hayno waxqabadyo barnaamij lacag caddaan ah. HI ahaan, waajibaadkeena waxaa kujiro dhaqancelinta, helitaanka adeegyada, u doodista, taageerada nafsaani-bulsho, iyo waxbarashada loo dhan yahay. Haddii dadka ay u baahan yihiin adeeg kale oo ka baxsan waajibaadkeena, waxaan u gudbinnaa hay'adaha ay khusayso

Si joogto ah gacmaha ugu dhaqo biyo socdo iyo saabuun

Xiro maaskaro ama afduubka loo yaqaano facemask

Aad ha ugu dhawaan qofka kale waxaadna u jirtaa ugu yaraan hal miitir

Sual: Tirada cunaada ee aan helno naguma filno, qiyaasta cunaada ee aan helno wuxuu u dhigmaa 1000 Kshs, dhammaanteyna waan fahamsanahay in qiyaasta ee dabooli karin baahida cuntada ee bisha oo dhan. Waxaa sidoo kale jira 500 Kshs Bamba chakula oo aan ka helno WFP; tani waxyar ayay nagu filan tahay. Waxaan maqalnay in DRC ay bixiso foojaa cunto ah, isla markaana waxaan ka codsanay hayaada HI, laakiin waxba kama helin. Sidaa darteed, waxaan ka codsaneynaa hayadaaha UNHCR iyo HI inay bixiyaan foojaa cuuno oo cayiman.taas oo u dhigaanto qaab lacaageed ama cuuno oo loogu tala galay dadka naafada ah, marka laga reebo cuuna la siiyo dadka caadiga ah.

Gudoomiyaha, Gudiga Naafada Xerada Dhagaxley

Jawabta Hayada HI: DRC waxay aqoonsataa kuwa ugu nugul xubnaha bulshada ee loogu talagalay foojagaa cuntada, waxaan leenahay qaar ka mid ah dadka naafada ah ee ka faa'iideysta, laakiin dhammaantood ma buuxiyaan shuruudaha bartilmaameedka. Tani waxay sidoo kale kuxirantahay helitaanka lacag ee danka haya'daha.

WFP waxay cunno bixisa halmar labadi bilood. Annagu awood uma lihin in la xakameeyo tirada cuntada, waa waajibaad saaran WFP iyo UNCHCR, haddii cunno ku filan tahay iyo in kale, waa mawduuc ay ka wada hadlayaan WFP iyo UNHCR.

Gurigaaga joog oo ha ka soo bixin hadii dan muhiim ah aadan lahayn

Hadii aad isku aragto astaamaha la midka ah hergabka sida qandhada, qufac, neefsashada oo ku dhibto isbitaal tag

Sual: Waxaa jiray gaari dadka qaadi jiray gaar ahaan kuwa sariir jiifta ah oo aan awoodin inay kireystaan gaari naftooda si ay u xaadiraan daaweynta duugista, tan ma dhacdo. Waxaa jira baahiyo badan waxeyna ku kordheen cabuqa Coronavirus.

Gudoomiyaha, Gudiga Naafada Xerada Dhagaxley

Jawabta Hayada HI: HI waxey taksi ku leedahay IFO iyo Dhagaxley si ay uga taageerto dadka naafada ah caqabadaha dhaqdhaqaaqa. Dhagaxley, waxaan u qoondeynay 20 safar iyo Ifo 10 safar taksi. Waxaan sidoo kale ku taageernaa caawinta gaari dameeraha ee IFO iyo Dhagaxley, laakiin sababaha 'Covid-19' awgeed, waxaan qaadanay habka ballan qabsashada, halkaas oo aan ku ballansanno adeegyada gaadiidka macaamiisha. Si kastaba ha noqotee, waxaan fahamsanahay in adeegyadu hoos udhaceen, laakiin waxaan isku dayeynaa inaan hubino in adeegyadu ay socdaan.

Sual: Tan iyo markii cabuuqa Corona bilaabatay, dhammaan ururadu way joojiyeen shaqoo. Ma eedeyno iyaga, laakiin waxaan codsaneynaa adeegyo. Dad kooban ayaa hela daaweynta duugista ah. Waxaan jeclaan lahaa inaan weydiiyo UNHCR sababta aysan u caawinayn dadka nugul ee naafada ah waqtigan adag.

Gudoomiyaha, Gudiga Naafada Xerada Hagadera

Jawabta Hayada LWF: Waan fahamsanahay oo aan dareemayaa dadkeyda ay khusayso (POC) ee aan siinaynay adeeg dhan kaas oo gaabis yar ku yimid cabuuga Covid-19 awgood. Wax badan ayaa sii wanaajin doona hadda in borotokoollada iyo taxaddarrada ku saabsan Covid-19 la dhowrayo. Waxaan dooneynaa in badan oo ka mid ah shaqaalaha inaay tagan baloogyada.

Sual: Aniga oo ku hadlaya magaca qof kasta oo naafo ah, waxaan ka codsanayaa dhammaan hay'adaha sida IRC, RAS, UNHCR, LWF, iyo kuwa kaleba inay noo soo gurmadaan, waan dhibaataysan nahay. Waa inay wax uun qabtaan intaanan la kulmin cawaaqib xumo. Waxaan sidoo kale jeclaan lahayn inaan codsano musqulo.

Gudoomiyaha, Gudiga Naafada Xerada Hagadera

Jawabta Hayada LWF: Waxaan fahamsanahay in hawlgallada ay yaraadeen; in kastoo, gebi ahaanba ma joogsan, laakiin waxaa laga yaabaa in joogitaankeena xeryaha aysan sidii hore u fiicnayn. Waxaa jira howlo badan oo socda, sida wacyigelinta bulshada iyo raadiyaha. Waxaa laga yaabaa in bixinta adeegyada muuqdo oo la bixin jiray ay yaraatay, laakiin waxaan rajeynayaa in bulshada ay u heli karaan adeegyo siyaabaha kala duwan ee aan isku dayeyno inaan u gaarsiino.

Waxaan u baahannahay inaan ka shaqeyno sida ay adeegyadu u sahlanaanayaan, iyo sida ay bulshada uga warqabto waxa socda. Waay ku mahadsan tahay, Internews sida ay noogu xirtay bulshada isla markaana ay noola wadaageysay cabashadooda, codsiyadooda, iyo aragtidooda.

Sual: Helitaanka adeegyadu wuu yaraaday tan iyo markii Koronavirus uu billowday Xitaa ma helno rubuc ka mid ah adeegyadii aan heli jirnay. Xitaa helitaanka qalabka waa dhibaato. Waxaan u maleyneynaa in LWF aysan helin taageeradii ay horay u heli jirtay taasoo anaga sidoo kale saameyn nagu yeeshay. Waxaan ka codsaneynaa ururada inay noo soo gurmadaan. Maalin hore, waxaa naloo qoondeeyay 5 suuli, waxaan leenahay waad mahadsantahay, laakiin 5 suuli ma wada dabooli karaan baahida qof walbo. Waxaan jeclaan lahayn inaan codsanno wax intaas ka badan. Markii hore waxaa noo laa gudbin jiray isbitaalada sida Kijabe, tani way joogsatay tan iyo markii Korona ay bilaabatay. Waxaan uu baahanahay dib u bilaabida adeegyadas oo kale.

Dadka waaweyn, Dheddig, Xerada Xagardheer.

Jawabta Hayada HI: CARE aya mas'uul ka ah bixinta musqulaha. HI ahaan, doorkeennu waa inaan sameyno qiimeyn deegaan, aqoonsiga qofka u baahan musqul; mar haddii aan xaqiijinno, waxaan u gudbinnaa Daryeelka. Haddii qofku musqul haysto laakiin uusan haysan kursi, waxaan siinaynaa kuraas maxalli ah xarumaheena.

Sual: Waxaan u baahanahay caawimaad ku saabsan waxqabadyada caafimaadka ee aan laga heli karin qaxootiga dhadaab?

Daryeelaha, Xerada Ifo

Jawabta Hayada HI: Waxqabadyadda caafimaadka ee Ifo, waa waajibaadka Kenya Redcross iyo UNCHR. Haddii kiisku la xiriiro dadka naafada ah, waxaan u gudbinaa Kenya Redcross iyo MSF iyadoo aan ku talineyno in kiiska loo gudbiyo Nairobi ama Mombasa. Kadib, waa mas'uuliyadda shaqaalaha caafimaadka ee hay'adahaas inay qiimeeyaan kiiska si loo fududeeyo gudbinta kiiska ee adeeg caafimaad oo khaas ah oo dibadda ah. Waajibaadkayaga sida HI iyo LWF waxay dhammaanaysaa ka dib markaan gudbinno tixraacyada.

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan Qoraalkani ama dhibaatooyinka heysto bulshada Qaxootiga ah
Fariintaadda nooga soo gudbi ama naga so wac nambarada kala ah 0795376912 / 0702374399